

Markaad La soo Xiriirto

Khadka taleefanka ayaa caawimaad ku siin kara:

- Faham farqiga u dhexeeya dembi nacayb ah iyo dhacdo eex ku saleysan
- Baro ikhtiyaarrada iyo adeegyada taageero ee la heli karo
- La xiriir adeegyada deegaankaaga ee u adeegga oo mudnaanta siiya dhibbanaha, fahmaya dhaqamada kala duwan, isla markaana tixgelinaya dhaawacyada nafsiyeed

Waxaad la xiriiri kartaa Khadka taleefanka haddii aad si toos ah ula kulantay dhacdada ama aad aragtay.

Xog ku saabsan Hate Crimes & Bias Incidents Hotline

Khadka taleefanka waa meel bixisa macluumaad iyo gudbin adeegyo oo aan ahayn xaaladaha degdegga ah, si looga caawiyo dadka ay saameeyeen dembiyada naceybka iyo dhacdooyinka eexda inay helaan taageero. Khadka taleefanka waxaa lagu heli karaa luuqado badan, waana mid leh asturnaan. Khadka taleefanka wuxuu la xiriiraa hay'adaha fulinta sharciga oo keliya marka aad rabto oo aad oggolaansho bixiso.

Sida Loo Soo Sheego



855-225-1010

atg.wa.gov/report-hate



Waxaa lagugu xiri doonaa qof ku hadla luuqaddaada.



Washington State Hate Crimes & Bias Incidents Hotline

Soo sheeg Naceybka. Hel Taageero.

Naceybka iyo eexdu waxay saameyn dhab ah ku yeeshaan shakhsiyadka, qoysaska, iyo bulshooyinka. Washington State Hate Crimes & Bias Incidents Hotline (Khadka taleefanka ee Gobolka Washington ee Dambiyada Naceybka iyo Dhacdooyinka Eexda) wuxuu diyaar u yahay inuu taageero siiyo qof kasta oo la kulmay ama markhaati ka noqday fal nacayb ah.

Khadka taleefanka wuxuu bixiyaa caawimaad **bilaash ah oo asturnaan leh** oo laga heli karo gobolka oo dhan. Uma baahnid inaad ogaato in waxa dhacay uu ahaa dembi iyo in kale. Waxaan kaa caawin doonaa inaad fahamto ikhtiyaarrada kuu bannaan.

La xiriir Khadka taleefanka



855-225-1010

atg.wa.gov/report-hate



Waxaa lagu heli karaa luuqado badan

Khadka taleefanka waa mid asturnaan leh, bilaash ah, wuxuuna ka shaqeeyaa gobolka oo dhan iyadoon loo eegin xaaladaada sharciga. Annagu ma nihin boolis, mana u gudbino booliska wax macluumaad ah adigoon oggolaansho na siin.

Waxaa bixiya Washington State Office of the Attorney General (Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington).

Khadka taleefanka waa mid asturnaan leh, bilaash ah, wuxuuna ka shaqeeyaa gobolka oo dhan iyadoon loo eegin xaaladaada sharciga. Annagu ma nihin boolis, mana u gudbino booliska wax macluumaad ah adigoon oggolaansho na siin.

Waxaa bixiya Washington State Office of the Attorney General (Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington).



Soo sheeg Naceybka.
Hel Taageero.

Waa Maxay Dembi Nacayb ah?

Marka la joogo Gobolka Washington, dembi nacayb ah wuxuu noqon karaa waxyaabo badan. Waxay noqon kartaa **gacan qaad ula kac ah oo shar leh, burburinta hanti, ama hanjabaad weerar ama burburin hanti** oo loo geysto qof kale.

Dembi nacayb ah waxaa loo sameeyaa sabab la xiriirta sida qofka loo arko ama aqoonsiga dhabta ah ee qofka yahay, sida

- Isirka
- Midabka
- Diinta
- Asalka qoyska uu qofka ka soo jeedo
- Wadanka qofku u dhashay
- Jinsiga
- Dookha galmada
- Muujinta ama aqoonsiga jinsiga
- Naafonimo maskaxeed, jireed, ama dareened

Dembiyada naceybka waa dembiyo culus oo sharci ah oo ka jira Gobolka Washington (RCW 9A.36.080).

Waa Maxay Dhacdo Eex ku Saleysan?

Dhacdo eex ku saleysan waa **muujin cadho ama nacayb** oo loo jeediyo qof kale sabab la xiriirta sida qofka loo arko ama aqoonsiga dhabta ah ee qofka, sida:

- Isirka
- Midabka
- Caqiidada ama diinta
- Asalka qoyska uu qofka ka soo jeedo
- Wadanka qofku u dhashay
- Xaaladda muwaadinimo ama xaaladda socdaalka
- Jinsiga
- Xaaladda askari hore oo si sharaf leh shaqada uga fariistay ama xaalada milatari
- Dookha galmada
- Muujinta ama aqoonsiga jinsiga
- Naafonimo dareen, maskaxeed, ama jireed
- Isticmaalka eey caawineed oo tababaran ama xayawaan adeeg

Dhacdo eex ku saleysan ma gaarto heer dembi sharci ahaan la aqoonsan yahay.

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- Isticmaalka erayo aflagaado ah oo ku saleysan sifooyinka qofka loo arko.
- Abuurista sawirro ama sawir gacmeedyo cunsuriyad ama aflagaado ah.
- Ku maadaysiga naafonimada qof, dhaqamada iyo caadooyinka qofka.